



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI LR. 42

TAARIIKH: 31/12/2020

ANSIXINTA SHARCIGA WAX-KA-BEDALIDDA QODOBKA 10AAD EE SHARCIGA LAGU
DHISEY GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE XUDUUDAHA FEDERAALKA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/341/2/B-10/20
taariikh 29/12/2020 kuna saabsan ansixinta Wax-ka-bedalidda Qodobka
10aad ee Sharciga Lagu Dhisey Guddiga Madaxa-Bannaan ee
Xuduudaha iyo Federaalka

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday
Sharciga Wax-ka-bedalidda Qodobka 10aad ee Sharciga Lagu Dhisey Guddiga Madaxa-bannaan
ee Xuduudaha Federaalka

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga
ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 31/12/2020



Madaxweynaha J. F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"



Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

الرقم: 352/2/B-10/20

التاريخ Mogadishu, December 29, 2020

**Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.**

**Ujeedo: Soo Gudbinta Ansaxinta wax- ka-beddelid Qodobka 10aad Sharciga lagu
dhisay Guddiga Madaxa-banbaan ee Xuduudaha iyo Federaalka**

Mudane Madaxweyne,

Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya ansaxiyey wax- ka-beddelka Qodobka 10aad Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa-banbaan ee Xuduudaha iyo Federaalka oo halkaan ku lifaaqan, wuxuu Golaha Shacabka Kalfadhiga 8-aad kulankiisii 2-aad taariikhdu markay ahayd 31/10/2020, iyadoo 142 Xildhibaan xaadir yihiin, codayntuna sidaan ayay u dhacday:

Oggol: 140;

Diiday: 1;

Ka aamustay: 1

Hadaba M.ne Madaxweyne, Maadaama oo Aqalkii sare Doorasho ku maqanyahay, waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (q) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya kaaga codsanayaa inaad go'aanka Golaha ku ogolaato xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

Naga guddoon salaan diiran iyo garab aar ah.

M.ne Mahad Cabdala Cabdullah

Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS

**Xaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.**

**Og: Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulada Gobolada iyo
Amniga ee Golaha Shacabka.**

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.

Tell: +252612224442 / +252-615577472


E-mail: speaker@parliament.gov.so

Website: www.parliament.gov.so

Ansixin Ansaxinta wax- ka-beddelid Qodobka 10aad Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa-banbaan ee Xuduudaha iyo Federaalka

Kusimaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye ku-xigeenka 2aad-Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS


Tirada Xubnaha Codeysay 142: Oggol: 140, Diiday: 1; Aamustay: 1;


Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad



Taariikh: December 29, 2020

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS


Saxiix: M. ne Abdiweli Sh. Ibrahim Muudey



Taariikh: December 29, 2020

Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS


Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux



Taariikh: December 29, 2020



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

QARAAR KU SAABSAN

**ANSIXINTA WAX- KA-BEDDELID QODOBKA
10AAD SHARCIGA LAGU DHISAY GUDDIGA
MADAXA-BANBAAN EE XUDUUDAHA IYO
FEDERAALKA**

Muqdisho, Nov 2, 2020

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

- Markuu Arkey :** Qodobka 10aad Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa-banbaan ee Xuduudaha iyo Federaalka
- Markuu Arkey:** Qodobka 111aad iyo 111E Dastuurka Federaalka iyo Qodobka 87aad Faqradda 1aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;
- Markuu Arkey:** Soojeedinta Guddiga Arrimaha Gudaha ee Golaha Shacabka **Lam. GAGM & A/B10/0044/2020** kuna taariikhsan 05/07/2020 kuna saabsan wax- ka-beddelid Sharciga LR.75 qodobkiisa 10aad ee nuxurkeedu ahayd cusboonnaysiin muddo xileedka Guddiga Madaxa-banbaan ee Xuduudaha iyo Federaalka;
- Markuu Arkey:** Howlaha mugga leh iyo horumarka balaaran uu ku talaabsaday Guddiga Madaxa-Bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka muddadii uu jiray;
- Markuu Arkey:** Baahida loo qabo in la dhameystiro howlaha soohdimeynta Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Faderaalka iyo sameynta khariiradaha rasmiga ah Dalka maadaama xil-haynta Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka ay ku egtahay Sebtember 2020;

Tix: GSH/B-10/ /20
Kalfadhiga: 8aad
Kulankiisa: 2aad

Taariikh: Nov 2, 2020

Markuu Dhageystey; Doodii Xildhibaanadda Golaha Shacabka eek u saabsanayd cusboonaysiinta muddada Xilhaynta ee Guddiga Xuduudaha iyo Fadaraalka.

Asaga oo ku Kulansan: Kalfadhiga 8aad Kulankiisa 2aad ee Oktoobar 31, 2020:

WUXUU GO'AAMIYEEY QODOBBADA SOO SOCDA:

Qodobka 1-aad:

Golaha Shacabka wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Wax- Ka-Beddelid Qodobka 10aad Sharciga Lagu Dhisay Guddiga Madaxa-Banbaan ee Xuduudaha iyo Federaalka, iyadoo la cusboonaysiiyey mudada Xilhaynta Guddiga hal mar (Afar Sano) oo ka bilaabmaysa 1da Oktoober,2020;


Qodobka 2aad:

Qaraarka waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si ugu ogolaado xeer Madaxweyne, loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

M. ne Mahad Cabdala Cawad
Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka



Bogga 2aad



**JUMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

QARAAR KU SAABSAN

**ANSIXINTA WAX-KA-BEDDELID QODOBKA
10AAD SHARCIGA LAGU DHISAY GUDDIGA
MADAXABANNAAN EE XUDUUDAHA IYO
FEDERAALKA**

Muqdisho, 2^{da} Nofeembar 2020

Tix: GSH/B-10/33/20
Kalfadhiga: 8aad
Kulankiisa: 2aad

Taariikh: 2^{da} Nofeembar 2020

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

- Markuu Arkey:** Qodobka 10aad ee Sharci Lr. 75 oo lagu dhisay Guddiga Madaxabannan ee Xuduudaha iyo Federaalka
- Markuu Arkey:** Qodobka 111aad ee Dastuurka JFS oo qeexaya Sameynta Guddiyada Madaxabannaan;
- Markuu Arkey:** Qodobka 111E ee Dastuurka JFS oo lagu dhisayo Guddiga Madaxabannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka;
- Markuu Arkey:** Qodobka 63aad (b) Dastuurka JFS iyo Qodobka 2aad Faqradda 1aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;
- Markuu Arkey:** Soojeedinta Guddiga Arrimaha Gudaha ee Golaha Shacabka Lam. GAGM & A/B10/0044/2020 ee 05/07/2020 kuna saabsan Wax-ka-beddelid Sharciga LR.75 Qodobkiisa 10aad oo nuxurkiisu yahay cusboonnaysiin muddo-xileedka Guddiga Madaxabannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka;
- Markuu Arkey:** Howlaha mugga leh iyo horumarka ballaaran uu ku talaabsaday Guddiga Madaxabannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka muddadii uu jiray;
- Markuu Arkey:** Baahida loo qabo in la dhameystiro howlaha soohdimeynta Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo sameynta khariiradaha rasmiga ah Dalka maadaama xil-haynta Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka ay ku ekeyd Sebtember 2020;
- Markuu Dhageystey;** Dooddii Xildhibaannada Golaha Shacabka ee ku saabsanayd cusboonnaysiinta muddada xilhaynta ee Guddiga Madaxabannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka.
- Asaga oo ku Kulansan:** Kalfadhiga 8aad Kulankiisa 2aad ee 31^{ka} Oktoobar 2020 oo ay goobjoog yihiin Boqol Afartan iyo Shan (145) Xildhibaan oo coddeynaya:

Tix: GSH/B-10/33/20

Kalfadhiga: 8aad

Kulankiisa: 2aad

Taariikh: 2^{da} Nofeembar 2020


WUXUU GO'AAMIYEEY QODOBBADA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad:

Golaha Shacabka wuxuu wadar-oggol ku ansixiyay Wax-ka-beddelid Qodobka 10aad ee Sharci Lr. 75 oo lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka, iyadoo loo cusboonaysiiyey mudda xilhaynta Guddiga hal mar oo Afar (4) sano ah oo ka bilaabmayssa 1^{da} Oktoobar 2020.

Qodobka 2aad:

Wax-ka-beddelka Qodobka 10aad ee Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Xuduudaha iyo Federalka waxaa loo gudbinayaa Golaha Aqalka Sare ee BFS si ay wajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan si waafaqsan Qodobka 90aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka.



M. Maxamed Mursal Sh. Cabdiraxmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GUDDIGA ARRIMAHA GUDAHA, MAAMULADDA GOBOLLADA & AMINIGA

Ref: GAGM & A/B10/0044/2020

TR: 05/07/2020

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS

=Muqdisho=

Ujeedo: Soojedin wax- ka-beddelid Sharciga I.R.75 qodobkiisa 10aad oo ku saabsan muddo xileedka Guddiga Madaxa-banbaan ee Xuduudaha iyo Federaalka.

Salaan iyo qadarin kadib,


Mudane Guddoomiye, waxaa sharaf u ah Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulladda Gobolladda & Amniga ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya in uu idiin soo gudbiyo wax-ka-beddelka Sharciga LR.75 qodobkiisa 10aad oo ku saabsan muddo xileedka Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka oo ay isku raaceen xubnaha Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulladda Gobolladda & Amniga ee Golaha Shacabka kadib markii ay latashi la sameeyeen Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka.

Talo soojedin:-

Talo soojedintan waxay ku salaysan tahay arrimahan soo socda:-

Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulladda Gobolladda & Amniga ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya kadib:

- Markuu dhageystay : warbixinta Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka, arkeyna codisigiisa wax- ka- beddelka muddo xileedka Guddiga.



- **Markuu arkay:** howlaha mugga leh iyo horumarka balaaran uu ku talaabsaday Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka muddadii uu jirayoo ay ugu mudan yihiin:

- Hirgelinta xarunta uu Guddigu ku shaqeeyo iyo qalabeynteeda, shaqaaleynta xirfadleyaal, howlgelinta xafiiska khariidadeynta iyo maamulka xog-dhuleedka dalka.
- Dhameystirka warbixinta dastuuriga ah ee Dhameystirka Sharciyadda Dowlad Goboleedyada ka hanaqaaday dalka kadib daraasado cilmi ah uu sameeyay Guddigu iyo latashiyo dhan walbo ah uu la yeeshay madaxda iyo dadweynaha Dowlad Goboleedyada.
- Diyaarinta habraacyada soohdimeynta iyo uruurinta xogihii soohdimaha gobollada iyo degmooyinka dalka ee kahor 1991-dii si loo sameeyo ama loo xaqiijiyo xariiq soohdimeedyo saxan oo sugan ay yeeshaan Dowlad Goboleedyada dalka. iyo in ay gabo gabo u mareyso xariiq soohdimeedkii ugu horeeyey ee u dhaxeeya labada dowladgoboleed ee Hirshabeelle iyo Koonfur-galbeed.
- Dejinta nidaamka dib-u-sixidda xog-dhuleedka iyo sameynta khariiddo rasmi ah iyadoo la soo ururiyay khariiddihii iyo xog-dhuleedkii dalka ee hore u jiray.
- Iyo kuwo kale.

- **Markuu arkay :** diyaargarowga Guddigu ka sameeyay arrimaha farsamo ee lagu sugayo xariiq soohdimeedyada Dowlad Goboleedyada haseyeeshee duruufaha dhaqaale, caqabadaha amni iyo siyaasadeed ay Guddigu u suurogeliweyday in uu dhameystiro soohdimihii Dowlad Goboleedyada.


- **Markuu arkay** baahida loo qabo in la dhameystiro howlaha soohdimeynta Maamullada iyo sameynta khariiradaha rasmiga ah Dalka maadaama xil-haynta Guddiga Madaxa Bannaaan ee Xuduudaha iyo Federaalka ay ku egtahay Sebtember 2020.

Sidaas darteed, Guddiga Arrimaha Gudaha , Maamulladda Gobolladda & Amniga ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu soojeedinayaa wax- ka-beddelka Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa-bannaaan ee Xuduudaha iyo Federaalka Sharci Lr 75 Qodobkiisa 10aad oo ku saabsan muddada xil-heynta Guddiga:-

Qodobka 10aad ee sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa Bannaaan ee Xuduudaha iyo Federaalka waxaa loo dhigay sida hoos ku qoran :-

1. Guddiga Madaxa Bannaaan ee Xuduudaha iyo Federaalka waxaa loo dhisay muddo ku jaan-go'an inta ay ka soo dhammeystirayaan astaynta Xuduudaha Maamul Goboleedyada.
2. Guddiga Madaxa Bannaaan ee Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu u soo gudbinayaa Golaha Shacabka BJFS talooyinkiisa ku saabsan astaameynta Xuduudaha Degmooyinka , Maamul Goboleedyada Iyo Qaab dhismeedka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka si waafaqsan Qodobka 4aad Farqaddiisa 1aad (g) iyo Qodobka 24aad Farqadiisa 1aad ee Sharcigaan.
3. Xil-haynta Guddiga Madaxa Bannaaan ee Xuduudaha iyo Federaalka waxaa lagu jaan-gooyey inta ay kasoo dhammeystirayaan astaynta Xuduudaha Degmooyinka iyo Maamul Gobolleedyadda Dalka kuna eg 30-ka Sebteembar 2024.

Wada shaqeyn wacan



Xildhibaan Maxamed Cabdulle Faarax (Geeseey)

Kusimaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Arrimaha
Gudaha, Maamulada Goboladda & Amniga ee Golaha Shacabka BFS.